



KU SAABSAN WADAADA BREKENRIDGE EE MASHRUUCA KONTOROLKA BUTAACA BULAACADA ISKU DHAFKAN

Waa maxay sababta Bullaacadaha Buffalo u samaynayso mashruucan?

Bullaacadaha Buffalo waxay si dadaal leh uga shaqaynaysaa sidii ay u hagaajin lahayd kaabayaasha bulaacadaha ee magaalada si kharash-yar ah taasoo hoos u dhigi doonta isku-darka qulqulka bulaacadaha (CSOs) ee saameeya marin-biyoodyada deegaanka.

Mashruucani waxa uu bedeli doonaa oo dib-u-dayactiri doonaa bulaacadaha ka weyn yahay 100 sano waxana uu u jiray doonaa waddo kale oo loo maro warshadda daawaynta biyaha wasakhda ah, iyada oo lagu ekayn doono CSOs xaga Kanaalka Black Rock.

Maxaa ka qayb ah mashruucan?

West Ave. (laga bilaabo Breckenridge St. ilaa Lafayette Ave.):

- Bullaacad cusub oo la isku-dhaf ah
- Beddelka bulaacadaha isku dhafan ee dhinac kasta
- Dib-ugu-xiriirinta geesaha guriga/dhismaha
- Xarun biyo oo cusub oo aan lahayn Balambam
- Ku beddelashada adeeg kasta oo balambamka biyaha ah adeegyo cusub oo naxaasta ah
- Laami cusub oo gees ilaa ka gees ah

Breckenridge St. (laga bilaabo West Ave. ilaa Herkimer St.):

- Dahaarka iyo hagaajinta bulaacada isku-dhafan ee jiray

WAA MAXAY FAA'IIDOOYINKA?




Yaraynta Qadarka Nafaqooyinka Ku Qulqulaya Kanaalka Black Rock Inta lagu jiro Dhacdooyinka Dabaylaha oo Hagaajinta tayada Biyaha



8 Milyan oo Gallaan oo Butaaca Bulaacadaha Isku-dhafan ah ayaa Laga Hortagayaa ee ku aadanaa Kanaalka Black Rock ee Sannadka Caadiga ah

AAGGA MASHRUUCA



Bullaacad Cusub oo Isku-dhafan (Duufaan iyo Fayadhowr) oo ku taal bartamaha **West Ave.** inta u dhaxaysa **Lafayette Ave.** iyo **Breckenridge St.**, iyo Xarun Biyo oo Cusub

Xadka Laamiga Cusub ee Jidka

Dib-u-xiriirinta Bulaacadaha Dhismaha iyo Ku Beddelidda Adeegyada Biyaha Macdanta ee Dhisme Jiray (labada dhinac ee **West Ave.**; Guryo qiyaas qaadasho ah ayaa muuqda)

badelidda Bullaacad Isku-dhafan oo dhinac walba ah ee **West Ave.** inta u dhaxaysa **Lafayette Ave.** iyo **Breckenridge St.**

Ku rakibidda khadad gudaha bulaacada horay u jirtay ee xarunta **Breckenridge St.** inta u dhaxaysa **West Ave.** iyo **Herkimer St.**

SIDEE AYAY DHISMAHA U SAAMEYN KARTAA GANACSIGA IYO ADEEGYADA DEGAANKA?

Dhismuhu ma saameyn doono ganacsiyada deegaanka, leexinta wadadana waxay hubin doontaa in adeegyada degdegga ahi ay mari karaan dhammaan goobaha si kasta oo ay u jiraan waddooyin xiran.

MA JIRAAN ISBEDELO KU BAARKINKA GAADIIDKA DADWEYNAHA INTA DHISMADA SOCOTO?


Isbeddel ku meel gaar ah oo lagu sameeyo baarkinka iyo gaadiidka dadweynaha ayaa laga yaabaa inay dhacaan inta uu dhismuhu socdo, laakiin adeegyadu waxay ku sii socon doonaan waddooyinka dib loo habeeyay. Wargelin hore ayaa la samayn doonaa

SAAMAYNTA GAADIIDKA AY KU YEELANAYSO

Inta uu socdo dhismaha, dadka deegaanka waxay filan karaan inay arkaan qalabka dhismaha ee wadada iyo qaababka cusub ee taraafikada ee goobta, oo ay ku jiraan:


- Xiridda Qayb ama Wadda oo dhan
- Xiritaanka Dhinaca wadada ee socodka
- Baarkinka wadada oo xadidan
- Waddo leexin suurtagal ah

Sawirada dhanka midig ah ayaa muujinaya tusaalayaal laga soo qaatay mashaariic hore ee Bullaacadaha Buffalo ee sida ay u ekaan karaan kantaroolka taraafiggu.



WADDO LEEIXINTA XIRITAANKA KEENAY EE LAFAYETTE AVENUE IYO WEST AVENUE

Marka dhismuhu gaaro isgoyska Lafayette Avenue iyo West Avenue, isgoysku wuxuu u baahan doonaa in la xiro dhowr toddobaad si loo dhiso qayb iyo god hoosaad cusub. Wareeg ayaa jiri doona inta lagu jiro wakhtigan, sida hoos ku cad.




MUDDAYNTA LA FILAYO

Dhismuhu waxa loo qorsheeyay in uu bilaabmo guga 2026 waxana la dhamayn doona dhamaadka 2028. Dhismaha ayaa la filayaa in loo dhameeyo qaybo-qaybo (guud ahaan hal baloog markiiba) sida ka muuqata shaxda hoose.

Habka marxalad-marxaladanta wuxuu gacan ka geysan doonaa yaraynta carqaladaynta kooban ee xaafadda, sida buuqa iyo boodhka, intii suurtagal ah.

Ogeysiisyada waxaa gacanta loogu geyn doonaa dadka deegaanka ugu yaraan hal toddobaad ka hor inta aan dhismuhu bilaabmin iyadoo macluumaad faahfaahsan la bixin doono.



SIDEE LOO MAALGALINAYAA SHAQADAN?

Bulaacadda Buffalo waxa uu mashruucan ku bixin doonaa deymo dulsarkooda yar yahay, waxana uu raadin doonaa deeqaha gobolka New York si uu u kabo maalgelinta mashruuca



Iskaan ka qaad koodka QR si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo jadwalka wargelinta inta ay socoto dhismaha

